

SIYAASADDA SHAQO-JOOJINTA/XIRIDDA AKOONKA DARAWALKA EE MINNESOTA



Darawalada iyo baabuur-raacayaashu waa qayb ka mid ah bulshada Lyft, waana yoolkayagu inaan hirgelinno habab si aan labada dhinacba u ilaalino. Isku dheellitirka badqabka dhammaan dadka isticmaalaya madasha/nidaamka Lyft iyadoo darawallada loo oggolaanayo inay sii wadaan wax ku biirinta bulshada Lyft iyo kasbashada lacag ayaa udub dhexaad u ah shaqada Lyft ay qabato. Darawaliintu waxay oggolaadeen inay u hoggaansamaan Siyaasaddan Shaqo-joojinta, iyo sidoo kale Shuruudaha Adeegga ee Lyft.

WAA MAXAY SABABTA AY SHAQO-JOOJINTA U DHACDO?

Sida lagu qeexay Shuruudaha Adeegga ee Lyft, arrimo kala duwan ayaa keeni kara in akoonka loo xiro si ku meelgaar ah ama si joogto ah, iyadoo la raacayo Shuruudaha Adeegga ee Lyft. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah, laakiin kuma xaddidno:



ARIMAHA BADQABKA

Si wax looga qabto dadka ay suurtagal tahay inaysan ilaalin badqabka ee laga soo gudbiyay eedaymo ku saabsan baabuur-wadis aan badqab ahayn, dhibaatayn, waxyeelo, iyo takoor.



SHURUUDAHA SHARCIYEYNTA

Darawalada aan buuxinin miqyaasyada hubinta waxyaabaha loo baahan yahay/DMV, ama kuwa haysta dukumeenti darawalnimo/baabuur oo aan ansax ahayn.



KHIYAANO

Darawalada isku daya inay khiyaamo ku kacaan, tusaale ahaan, ku been abuurashada aqoonsiga, ama ku lug yeelashada khiyaano ku aadan lacag bixinta, iyo/ama xatooyada.



MAHADHADA MADASHA/NIDAAMKA

Darawalada digniino hela isdaba joog ah oo ka imanaya Lyft oo la xidhiidha habdhaqan ay ka soo sheegteen baabuur-raacayaasha adeegsada nidaamka.

DHAQAN-XUMO DARAN

Wixii ah xiridda akoonka ee ku salaysan eedaymaha dhaqan xumada daran, akoonkaaga Lyft ayaa laga yaabaa in la xiro iyadoon lagu siin ogeysiis hordhac ah.

Dhaqan xumada daran waxaa ka mid ah, laakiin kuma xaddidno, eedeymaha soo socda: takoorka, kaxaynta baabuur iyadoo uu darawalku isticmaalay maandooriye iyo khamri, dhaqan khatar gelinaya badqabka dadweynaha, dhibaatayn, oo ay ku jirto faraxumeynta ama dhibaatayn ku salaysan in qofku xubin ka yahay waxyaabo la ilaaliyo, ama xadgudub jireed ama faraxumeyn, iyo khiyaano badheedh ah ama la ogyahay.

HABKAYAGA

AKOONKA DARAWALKA AYAA CALAAMAD LA SAARAY

Iyadoo la adeegsanayo warbixinta isticmaale ama app-ka

1

SHAQO-JOOJINTA KU MEELGAARKA AH (HADDII AY KHUSEEYSO)

Waxaa laga yaabaa inaan si ku meelgaar ah u joojino shaqada inta lagu gudajiro baaritaanka ama ilaa darawalku awoodo inuu dib u saxo arrinta. Darawalka waxaa lagu ogeysiin doonaa iimayl, taleefan ama app-ka Lyft.

2

DIBU SIXIDDA

Xaaladaha qaarkood (tusaale ahaan, dukumeentiyada dhacay), darawaladu waxay app-ka ku dhammaystiri karaan talaabooyin dibu sixid ah.

BAARITAANKA WAKIILKA

Waxaan maalgelin ku sameynay in aan macluumaad faahfaahsan ka ururino labada isticmaaleyaal ee ku haboon marka arrin la soo sheego. Isticmaalayaasha waxaa lagu dhiirigelinayaa inay soo gudbiyaan sawirada kamarada gudaha/daaqadda hore ee baabuurka, sawirada, warbixinada booliiska, iyo macluumaad kasta oo kale oo cadeyn ah. Waxaan si firfircoon dibu-eegis ugu samaynaa warbixinada baabuur-raacaha ee ku saabsan tuhunka/khiyaanada. Darawalada ayaa codsan kara inay taleefan kula hadlaan wakiilka baaritaanka sameynaya.

3

GO'AAN AYAA LA GAARAY OO WAA LAGA SOO WARBIXIYAY

Waanu ogeysiinaynaa darawalada natiijada kamadambaysta ah taasi oo noqon karta inay dibu bilaabi karaan baabuur-wadista, ama in akoonkooda si rasmi ah loo xiray.

HABKA RACFAANKA

Marka shaqo-joojintu dhacdo, hadafkayagu waa in darawaladu dareemaan taageero iyo ixtiraam inta lagu gudajiro nidaamka rafcaanka ku aadan joojinta shaqada kaasi oo ah mid ah cadaalad, leh ujeedo ahna macquul. Si aan sidaas u samayno, waxaanu bilownay badhan ku yaalo gudaha app-ka oo la habeeyey oo loogu talagalay darawaliinta si ay racfaan uga qaataan go'aamada shaqo-joojinta. Kanaalkan cusub wuxuu siinayaa darawaliinta awood ay ku siiyaan Lyft macluumaad kasta oo cusub ama la cusboonaysiiyay iyo sidoo kale awood ay si toos ah ugula xiriiraan koox taageero oo qaas u ah rafcaannada shaqo-joojinta.

- Marka darawalku helo ogeysiis ku aadan shaqo-joojin joogto ah, waxay codsan karaan in dib u-eegis lagu sameeyo go'aanka.
- Darawalada waxaa lagu dhiirgelinayaa inay bixiyaan caddayn ama macluumaad cusub, si kooxda Badqabka ee Lyft ay u samayn karaan dib u-eegis una gaari karaan go'aan cusub.
- Waxaa laga yaabaa inaan dibu furno shaqada/akoonko haddii ay jiraan caddayn ama macluumaad cusub oo beddelaya go'aankii asalka ahaa.
- Haddii aanan beddelin go'aanka, akoonku wuu xirnaan doonaa.
- Dhammaan go'aamada kamadambaysta ah ayaa lala socodsiiin doonaa darawalka 15 maalmood gudahooda, in la codsado wakhti dheeri ah iyadoo la raacayo sharci Minnesota mooyaane.

